# WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA

# SIYAASADDA QARAN EE SUMAHA BEERAHA

**2020**

## Gogol Dhig

Si loo taageero koboca dhaqaalaha, Dawlada Soomaaliya waxay qoresheyneysaa inay qaado caqabadaha waaweyn ee hortaagan wax-soo-saarka iyadoo loo marayo dejinta siyaasaddo kala duwan. Talaabooyinkan oo ay ka mid yihiin in nabadda wadanka oo dhan la sugo, in dib u dejin loo sameeyo reer miyiga beeraleydana dib loogu celiyo dhulbeereedka, in cilmibaarista (tijaabada) iyo fidinta beeraha dib loo soo celiyo lana dardargeliyo, in dib loo hagaajiyo mashaariicdii waraabka ee agagaarka wabiyada, in la casriyeeyo hab beerashada lana isticmaalo tiknoolojiyada cusub ee beerashada iyo in la abuuro jawi ganacsi iyadoo la tixgalenayo lana raacayo sharuucda suuqa. Iyadoo laga duulaayo taabagelinta suuqa, Wasaarada Beeraha iyo Waraabka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo kaashaneysa Wasaaradaha Beeraha ee heer Maamul Goboleed iyo hay'adaha dawliga ah oo ku shaqada leh, waxay siyaasad ka soo saartay (dullin)-dilayaasha (Pesticides) iyadoo looga gol-leeyahay in la sharciyeeyo ka ganacsiga iyo isticmaalka dullin-dilayaasha Soomaaliya oo dhan. Waqti-xaadirakan ma jiraan xakamaynta ka-ganacsiga iyo isticmaalka dullin-dilyaasha Soomaaliya oo dhan. Sharciyeyn la'aantan waa qatar dhaqaale, caafimaad iyo deegaan.

Ka ganacsiga iyo isticmaalka dullin-dilayaasha (Pesticides) aan la xakamayn waa qatar aad u weyn. Cayayaanka (dullinada) iyo nooleyaasha yar yar ee waxyeeleeya dalagga waxay awoodaan inay u adkeystaan oo aanay waxba u dhimin kiimikada ama sunta lagula dagaalamayo. U-adkeysiga oo ka yimid isticmaalka xad-dhaafka ah ee sunta iyo soo rogaalcelinta labaad ee cayaayanka iyo noolayasha yaryar (Pests) [ka dib markii sun xad-dhaaf ah la isticmaalay oo ay noolayaasha yaryar u adkeysteen] ayaa ah sababaha ugu waaweyn ee keena waxyeelo ka weyn kii hore ee dalagga laga daaweynayey. Isticmaalka xad-dhaafka ah iyo si-xun u-iticmaalka dullin-dilyaasha qaarkood oo dhalin kara inay ku dhex haraan wax ka badan dalaggii lagu dhayey sunta beeraha cayaanka looga dilo, haraagagaas kiimikada ah oo ka sareeya inta bani-aadamku cunto ahaan u quudan karo. Siyaasadan waxay gundhig u noqonaysaa Sharci xakameeya isticmaalka dullin-dilyaasha (Legislation of Pesticides) si wax looga qabto dhibaatooyinka iminka taagan. Qabyo-qoraalka siyaasaddan waxay tixgelinaysaa heshiisyada caalamiga ah iyo hindiseyaasha gobol si loo waafajiyo shuruudaha loo baahanyahay. Siyaasadan waxay sugaysaa in sharciga xakameynta isticamaalka dullin-dilayaasha uu la xiriirsan yahay lana jaanqaado shuruucda hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee badbaadada deegaanka, maareynta kiimikada iyo wax allaale wixii la halmaala siyaasaddan. Waxay kaloo siyaasaddan xaqiijinaysaa in marka dib u eegis lagu sameeyo sharciga uu la jaanqaado isbadelada iyo dib-u-eegista sharciyada mustaqbalka ee maamul si mar walba loo sugo in aanay qatari ka imaan dullin-dilayaasha lagu iibsho Soomaaliya ahna mid wax tarleh.

Horumarka beeraha Soomaliyeed waxaa hortaagan caqabado waaweyn sidii wadanku u gaaro horumar taabogal ah. In sunta cayaayaan-dilaha (dullin-dilaha) loo isticmaalo beeraha waxay

badbaadineysaa dalagga, sidaas darteedna, waxaa kor dhaya wax-soo-saarka beeraha. Wal wal badan ayaa ka jira isticmaalka sunta dullin-dilayaasha maadama aanu jirin sharci hufan oo xakameeya ka ganacsiga iyo isticmaalkooda. Waxaa kordhay isticmaalka sunta dullin-dileyaaasha iyo kororka weerarka dullinada ee uu beeraha ku hayo, iyo warbixinada la xaqiijiyey ee dad ku sumoobay suntan, dhammaan arimahan oo isbiirsaday ayaa waxay tusmeynayaan in ay Soomaliya ka jirto ku talaxtag isticmaalka sumaha cayaayaanka disha oo aan hufnayn taasoo sababi karta qatar weyn oo caafimaad iyo mid degaaanba. Sunta cayayaanka waxay aalaaba dishaa dullinka lala dagaalamayo iyo cayayaanka dabiiciga ah ee quuta ama cadowga ku ah kuwa lala dagaalamayo taas oo keeni karta qatar deegaan marka la suuliyo cayaanka kii qatarta ahaa iyo kuwa wanaagsan iyadoon loo aabayeelin.

Ugu dambayntii, anigoo ka faa'ideysanaya fursadaan, waxaa u mahadcelinayaa Midawga Yurub (EU) oo dhaqaale ku taageeray soo saarista siyaasaddan iyagoo maalgeliyeye mashruuca OUTREACH. Waxaan kaloo u mahadcelinayaa hay'adaha Adam Smith International (ASI) iyo Somali Agriculture Technical Group (SATG) oo fuliyey mashruucan OUTREACH iyo qubaradii ka shaqeysay Siyaasadda Dulin-Dilaha.

**Xildh. Saciid Xuseen Ciid**

**Wasiirka Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka**

**Dawladda Federaalka Soomaaliya**

# Tusmo


**Gogol Dhig** ........ **Error! Bookmark not defined.**

**Tusmo** ........ iii

**1. Hordhac** ........ 1

**2. Xaalada Dhanka Shariciga** ........ 1

**3. Caqabadaha Sharci** ........ 2

**4. Sababta loo Sameynayo Siyaasad Qaran ee Cayayaan-dlieyaasha** ........ 3

**4.1 Caddeymaha** ........ 5

**5. Ujeedada Siyaasada** ........ 6

**6. Mabaadiida Hagaysa Siyaasadda** ........ 14

**7. Aragtida Siyaasadeed** ........ 16

**8. Hawlgalka Siyaasadeed** ........ 16

**9. Ujeedada Guud ee Siyaasadeed** ........ 16

**9.1 Ujeedada Cayiman ee Siyaasadeed** ........ 16

**10. Maamulka iyo Isku Xirnaanta Hay'adaha** ........ 17

**11. Natiijada laga sugayo** ........ 18

**12. Jihada Siyaasadeed** ........ 19

**12.1 Iskaashi** ........ 19

**12.2 Soo dejinta** ........ 19

**13. Ka ganacsiga Dullin-dilaha iyo Suuq-geyntooda** ........ 20

**13.1 Kor u qaadidda tayada iyo qaybinta wanaagsan** ........ 20

**14. Wacyigelinta isticmaalka habboon ee cayayaan-dilayaasha** ........ 21

**14.1 Adeegyada Fidinta** ........ 21

**14.2 Cilmibaarista (Tijaabada) iyo Horumarinta** ........ 21

**15. Dhowridda degaanka iyo isbeddelka cimilada** ........ 21

**16. Heerarka Sharciyada iyo dhowridda tayada** ........ 22

**17. Maamulka iyo isku xirnaanta Hay'adaha** ........ 23

**Lifaaqa 1aad** ........ 23

## 1. Hordhac

Beeruhu waxay ahaayeen una yihiin lafdhabrta dhaqaalaha Soomaaliyeed. Xoolaha iyo dalaga beeraha ay ahaayeen welina yihiin ilaha dhaqaale, shaqo iyo waxdhoofinta Soomaaliya. Beeraha waxay kaalin mug leh ku leeyihiin dardar gelinta sidii Soomaaliya nabad iyo siyaasad degan ay ku gaari lahayd ayadooloo la maryo tubo badan oo ay ka mid yihiin isku filnaansho cunto, shaqo abuur, iyo dhaqaale koboc nagaada. Run ahaantii, dad badan oo soomaaliyeed waa reer guuraa ka hela ku nool wax soo saarka beeraha iyo xoolahah iyo meharada la halmaala. Sidaas dareteed horumarinta beeraha waa muqadis marka lala dagaalamayo nafaqo darada iyo cuno yarida heer qaran iyo heer caalami iyo la dagaalanka faqrinamo baahsan kuwaan oo ah waxyalaha sababa isqabqabsika dhasha qeyraad yari, kaasoo keena degganaan la'aan wadanka ku baahsan.

Hayeeshee wax soo saarka beeraha waqti xaadirkan waa hooseeyaa sababatuna waa arrimo badan oo siku shaqlan misana isbiirsaday oo ay ka mid tahay: dabad la'aanta ka jirta goboladii dhulbeereedyada ugu mihiimsanaa, isqabqabsi, iyo abaaro kuwanoo ku qasbay barakac reer miyigii oo magaalooyinkii beegsaday, waraabka iyo kaabayaasha wax soo saarka miyiga [dhul beereedk] oo liita, iyo aydoo hab casriyeed ka wax beershada, sida isticmaalka qalabka beeraha, abuur tayo leh iyo cayaandile, ay aad yar yihiin oo waliba si aan hagaagsaneyn oo cilmiyeysnayn loo itsicmaalo. Natiijadaha caqabadahaan waxaa sii kordhiyey maqnaanshaha hayado dawli ah iyo awood cilmiyeed waqtigan soomaliya dagaaladii aaffeyey ay ka soo baxaeyso.

## 2. Xaalada Dhanka Shariciga

Burburkii ka dhashay dagaaladii sokeeye ee 1990-kii inay hawgab noqdaan hay'adihii dawliga ahaa ay shaqadii gabaan. Shaqooyin badan oo xasaasi ahaa joogsaday sida kontoroolka waxa yaabaha beeraha la galiyo oo wax soo saarka kordhiya sida cayaan-dilayaasha ayaa markiiba joogsaday burburkii dawlada ka dib. Intaa waxaa dheer in awoodii farsamo iyo maareyn lagu shaciyo cusub lagu curin lahaa kuwii horey jirayna loo meel marin lahaa luntay, iyadoo misana kaabayaasha beeraha iyo adeegii xirfadeed sida talo sharciyeed iyo mid farsamo, shaybaaro, machadyo cilmibaaris iyo adeegyadii fidinta cilmiga beeraha iyo keydkii dukukeentiyada idilkoodba la waaeye burburka dartiis. Natiijadii waxay noqotay in beeraleydii, macaamiishii ku nool dalagyada, dadweyha iyo degaanka sy nuglaadaan qatarta ka imaan karta oo la xiriiirta maareyn iyo xakamin la'aanta ka-ganacsiga iyo isticmaalka cayaan-dilyaasha.

Sannadihii la soo dhaafay dawlada Soomaliyeed iyadoo kaashaneysa bulshada caalamka waxay ka hawl gashay sidii nabadd iyo deganaan wadanka loogu soo babaali lahaa iyadoo isla markaasna dib u dhisaysa hayadihii dawliga ahaa si bulshada loogu adeego koboc dhaqaalana loo dhiiri geliyo. Iyadoo arrimahan kor ku xusan laga duulayo ayey dawlada dooneyseysaa inay curiso sharci maareeya oo soo celiya koontorolkii rasmiga ahaa ee cayayaanlayaasha Soomaliya lagu isticmaalayo. Wasaarada Beeraha iyo Waraabka Soomaaliyeed ayadoo kaashaneysa wasaaradaha beeraha ee heer maamul goboleed waxay mas'uul ka tahay halabuurida/curinta/sameynta, dhaqangalinta iyo kormeerida/dabagalka/u kuurgalka siyaasaha beeraha, shariciyada iyo xeerka lagu maamulayo koontoroolka ku wajahan cayayaandilayaasha. Curinta iyo meelmarinta sharci hufan waa aas asska in la dhiso jawi sayaasadeed oo dhiiri galiya, fududeeya, iyo dhiirigelinta maalgashiga ee qeybaha kal duwan ee wax soo saarka beeraha.

In Soomaliaya loo sameeyo xeer siyaasadeed oo maareeya ka ganacsiga iyo isticmaalka cayaandilyaasha waa lama huraan. Run ahaantii in la abuuro xeerar suurta galiya jawi dhiiri galiya isticmaal ka hufan qatar waa lama dhaafaan si loo gaaro hadafyada guud (a) in 20% la kordhiyo soo saarka xabuubaha (cereals) sannadka 2019-ka (b) in la waanijiyo oo la sahlo nafaqo helidana la sugo iyo in la yareeyo si loo dabargooyo faqriga baahsan ee reer miyiga haysta. Dalaga beeraha Soomaliyeed ka soo go'a aad ayuu u yar oo 22% uun buu daboolaa baahida guud ee xabuubka ama firaaleyda (cereal) wadanka. Xitaa xliyada aadka u wanaagsan wax soo saarka dalaga beeraha ma dhaafo 40-50% baahidaguud ee xabuubka ama firaaleyda (cereal). Natiijada wax soo saar yarida beeraha waxay sababtay in beerlaeyda ay si ba'an ula il daran yihiin nafaqo daro marka loo eego wax soo saarka beeraha oo sidiisaba ku xiran xiliyada [is bedbela oo aan lagu tashin karin] iyo soo noqnoqoshada masiibooyinka dabiiciga ah sida fatahaada iyo abaaraha.

## 3. Caqabadaha Sharci

Cayayaandilyaasha waa walxo diyaarsan oo darban iyo shay macmal ah oo la sameeyey oo leh awood ku jirta oo dili karta ama koontorooli karta noolayaasha xun (jeermiska) iyo kuwa aan wax tarka lahayn sida cayaayanka iyo noolayaasha kale ee dalaga waxyeeleeya iyo cawska (jaanka) ka dhex baxa dalaga. Si cad oo aan mugdi lahayn haddii loo qeexo ah cayayaandile waa walxo kiimiko oo la diyaariyey si loogu laayo noolayaasha dalaga waxyeeleeya sida cayaayaanka ama naasleyda yar yar oo ilkha dhuuban sida jiirka iyo la dagaalanka kororka ama badashada nolayaasha yar yar e il maqabtada ah, Waxay kaloo noqon karaan walxo lagu

maareeyo dalaga sida ka ridista caleemaha ama caleemo ka qalajiska. Waxaa kaloo loo isticmaali karaa in lagu kontoroolo geedaha aan loo baahneyn ee ka dhex baxa beerta sida cawska ama (biocidal Products) wax kastoo loo isticmaalo in lagu laayo ama lagu yareeyo walxaha dalaga dhibaateeya ayadoon la iticmaalin shaqo gacmeed ama mashiin. Sidaas darted cayayaandileyaasha waxaa lo isticmaala si loo kordhiyo ama loo dhowro wax soo saarka beeraha iyo in la kordhiyo tayada wax soo saarka iyadoo la dhimayo shaqada gasha beeraha sida falitaanka. Haddii si hufan oo hagaagsan loo siticmaalo cayayaandilyaasha waxay qeyb libaax ka qaadan karaan kordhinta wax soo saarka, in la maareeyo fayo-dhawrka dhirta iyo in la fududeeyo beecmushtarka caalmiga ah ee dalaga beeraha. Lakiinse Cayaandilayaasha dhib u geysan karaan noolayaasha aan loogu tala gelin in la laayo iyo inay qatar aan loo qasdin gelin karaan dadka iyo degaanka. Shilal badan oo ay sunta cayayaanka sabbatay oo dad soomaliyeed aafeeyey ayaa la diwaan galiyey, Shilalkan oo isugu jira iyadoo aan loo qasdin loo liqay sunta ama jirka ay taabatay iyo ayadoo dadka qaar ay ula kac ay sunta u qateen ama ayadoo dalag sunta lagu dhayey la cunay. In kastoo ay yar tahay shilalka la xirrira sunta oo xad dhaafka ah dalaga lagu dhayey ee cusub isticmaalkiisa balse dhibta ugu baahsan oo ugu qatarsan waa tan ka ku habsata shaqaalaha iyo xirfadlayaasha sunta taabta ama u dhawaada waqtiyada dhayida, diyaarinta ama isku qooshida sunta ama nadiifinta iyo maareynta fuusttoyinka ama tagagyada laga dhameystay sunta. Caalamdaha astaanta u ah ku sumowga cayaandilyaasha waxaa madax wareer, shuban, matag iyo calool xanuun. Marka ay aad usoo noqnoqoto in sunta la qoosho, la taabto iyadoon la is ilaalinjirkana ay gasho waxay keeni kartaa cuduro ba'an sida kansarka, curyaaanimo dhalaanku ku dhasho ama cudurada taranka aafeeya oo ka dhasha walxaha qalaad e sunta ah jirka ku keydsama (bioaccumulation) madaama walxaha laga sameeyo cayaandilyaasha masnaca ah aanu jirka shiidi karin ka dib markay jirka noolaha galaan ka dibna xubnaha jirka ay ku tulmaan.

## 4. Sababta loo Sameynayo Siyaasad Qaran ee Cayayaan-dlieyaasha

Waqti xaadirkam Soomaaliay kama jiro sharci qaran rasmi ah oo maareeya ama koontoroola ka gancsiga iyo isticmaalka cayayaandilyaasha. Taas waxaa dheer marka lag tago qatarta caafimaad iyo degaan, in maareyn la'aanta ganacsiga cayayaandilyaasha ay keeni karto in waddana la keeno walxo been abuur ah (bug ah) oo aan tayo lahayn. Runtii xakameyn iyo xeer la'aanta soo dejinta walxahan tayo la'aanta ah waxay keenta in la dhaco beeraleyda ayadoo loo bandhigayo cayayaandilyaal been abuur ah oo wax yar ama waxba aan ku kordhinaynin waxsoosaarka, Tani waxay muujineysaa baahida Soomaliya u qabto xeer maamula ganacsiga iyo isticmaalka cayayaandilyaasha. Marka laga gudbo ilaalinta badqabka beeraleyda, iyo

fayoobida dadweynaha iyo badbaadinta degaanka, waxaa intaa soo raaca in xeerkani waddanka u saamaxaayo in uu buuxiyo sharuudaha ku waajibay ee xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ay dhigayaan sida aad ka daalacan karto lifaaqa 1aad.

Waagii hore (Waqtigii Dawladii Dhexe), Wasaarada Beeraha oo kaliya ayaa lahayd masu'uuliyada soo dejinta iyo qeybinta cayayaandilyaasha wadanka badanaaba lacag la'aan ama qarash yar ayaa looga iibin jiray beeraha ganacsata waaweyn ama beeraha dawlada. Burburkii dawladii dhexe ka dib waxaa abuurmay ganacsiga iyo isticmaalka cayayaandilyaasha iyadoo aanay jirin xeer haga iyo dawlad ilaalisa dhowrida xeerka wadanka oo dhan. Xakameyni xeerid la'aanta ganacsiga iyo isticmaalka cayayaandilyaasha waxay qatar weyn oo joogta ah ku tahay dhaqaalaha, degaanka iyo caafimaadka bulshada. Sidaas darteed waa iney dawlada ay sameyso xeer iyo hay'ad dawli ah oo qaabilsan konntoroolka rasmiga ah ee cayayaandilyaasha sida shati bixinta iyo diiwaangelinta ganacsatada, habraac lagu ansixiyo cayayaandilayaasha cusub ee suuqa ku soo kordha iyo ilaalinta ku dhaqanka xeerarka sharciyeed. Intaa waxaa soo raaca in la dejiyo hab raac siyaasad ku saleysan oo sahalaya maareynta cayayaanka iy cayayaandilayaasha. Hab raaca waxaa ka mid ah dhiirigelinta qorshe aad looga fikiray oo isku dhafan (Integrated Pest Management IPM) oo ka kooban dhamaan farsamooyinka kala duwan ee loola dagaalamo cayayaanka oo la helo karo dhaqaalahana saamaxayo, kaaso dhimaya badasha cayyaaanka degaanka, cafimaadka dadweynaha iyo xayawaankaba aan dhib u geysanaynin. Qorshahan isku dhafka ah waxaa loo gaari karaa in tababaro cilmiyeed iyo abaalmrin [ciddii wanaag sameysa], in la dhiirigeliyo lana sahlo, lana kordhiyo helintaanka cayayaandilayaal qatartooda [qatarta degaanka iyo Caafimaadka dadweynaha] yar tahay, in la dhiirigeliyo cilmi barista, in olole wacyigelin dadweynaha loo sameeyo, iyo in tababarro loo sameeyo kormeeryaasha, ganacsatada tafaariqda iyo xirfadlayaasha ka shaqeysta meherada cayayaandilida. Xeer siyaasadeed sal adag ku fadhiya waa inuu lahaado dhamaan waxyaabaha aasaaska u ah sida hayado sharciyeed, xeer iyo habraac.

Natiijooyinka ka soo baxay baaritaanadii waxay muujiyeen baahida loo qabo hindise sharciyeedkan. Ka dib markay wadatashiyo badan dehx mareen Wasaarada Beeraha heer Qaran iyo Wasaaradaha Beeraha ee heer Dawlad Gobeloleed, waxaa leysla gartay in dawlada dhexe ay diyaariso xeerkii haggi lahaa kontoroolka cayayaandilayaasha. Intaa waxaa raaca Mashruuca OUTREACH ka dib markii uu la tashi sameeyey waxaa ka soo baxay in loo baahan yahay xeer maamula labadan dhinac siiba in laga abuuro Soomaaliya jawi ganacsi oo keena in la helo cayayaandilyaal tayo leh oo aan qatar lahayn.

## 4.1 Caddeymaha

Mashruuca OUTREACH wadatashiyadii uu sameeysay natiijadii ka soo baxaday waxay na tilmaameysaa:

b) Waxaa jira baahi baahsan oo loo qabo xeerar lagu hubiyo tayada cayayaandilayaasha, lagu abuuro diwaangelin lagu sameeyo ganacsata soo dejisa waxayaabaha beeraha kobciya, iyo in la wanaajiyo lana tayeeyo isticmaalka iyo habka looga shaqeeyo [diyaarinta sida isku darka walxaha kiimikada ah ee kala duwan] si loo loo fayodhowro dadka iyo degaanka. Run ahaantii, xogaha aan dheelitirneyen [oo aan is waafaqeynin] ee ku saabsan tayada iyo soo if baxa walaaca ay qabaan dadka ku hawlan sisilada wax soo saarka beeraha waxay ifin anyaan in xeer kontoroola cayeyaandilyaasha uu caawin karo karorka jawi sahla ganacsiga [Cayayaandilyaasha]. Xeer kontorool la’aanta oo sababeysa maqnaanshaha kormeer iyo lasocod [hubin] isticmaalka iyo hab maareynta waxay keentaa in dadka iyo degaankaba a anay ka badqabin walxaha qatarta ah ee cayayaandilyaasha ku jira. Waxaa jira tiro shilal ah oo la qoray kuwasoo sheegaya in dad, xayawaanka la dhaqdo iyo duurjoogba ku sumoobeen tasoo xitaa dhimashooyin inay jiraan lasoo tabiyey.

t) Waxaa muhiim ah in aan garowsanno in xaalada taagan iminka ee ah koobnaanta awooda teknoloojiyadeed iyo tan hay’adeed ee Wasaaradaha heer qaran iyo maamul goboleed ee hakinayesa in la dhaqan geliyo xeerarka waxay abuureysaa caqabad ah in la dajiyo lana fuliyo sharci dhameystiran oo saameyn leh. Inta aw Dawladu sharci u dejinayeso kaasoo qasbaya diwaangelinta soo dejinta, sameynta tusmooyin haga habka wanaagsan ee loo isticmaalo loona maareeyo waxyaalaha kobciya beeraha, iyo in si sharci ah baaris loogu sameeyo meelaha alaabta ka soo dekto sida dekadaha; bilowga hore aad bay u adkaan doontaa in gabi ahaanba la fuliyo sharciga siiba waqtiga dhow. In dhismooyin la dhiso, la sameeyo adeegga fidinta beeraha, in la qoro shaqaale iyo kobciyo farsamada iyo maareynta qibrada shaqaalaha.

j) Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay sharci iminka si talaabo talaabo ah loo fulin karo lana sii dhameystiri karo mustaqbalka marka awooda dawliga ah ay sii kororto, tasoo dawlada runtii u saamaxeysa inay isticmaasho awoodaha jira ee hayado goboleedka wadamada aan wax kasoo iibsano sida bariga afrika iyo waddama gacanka carbeed. Arrinkan waxaa lagu gaari karaa iyadoo heshiisyo labo geesood ah lala galo hay’adahaas [hay’adaha ka dhisan

wadamada aan wax kasoo iibsano] si loo maareyo loona hubiyo tayada iyo badqabka [qatar la'aanta] beecshurada ayadoo la raacayo habka xaqiijinta (Certification) inta la dhisayo awood fulineed.

x) Sharcigan waa inuu abuuraa xaalad ay ku shirkoobaan ama kuwada shaqeeyaan Dawlada iyo Gancasig-gaarka-looleeyahay ee qeybta beeraha si ay dawladu uga faaideysato xirfadda, qibrada iyo qeyraadka ganasiga gaarka loo leeyahay.

### 5. Ujeedada Siyaasada

Sida kor ku xusan Soomaaliya kama jiraan kontoroolo rasmi ah oo maareya soo dejinta cayaayaandilayaasha iyo/ama ma jiraan diwaan gelin qaran oo cadeyneysa cayaandilayaasha la ansixiyey iney wadanka soo galaan iyo ganacsata soo dejisa cayayaandilayaasha waqti xaadirkan. Sidoo kale wadanka gudihiisa ma jiraan kontoroolo lagu sameeyo habka loo sii habeeyo [sida kala qeybinta tafaariiqda] cayayaandilayaasha iyo hab isticmaalka lagu qoro ama ku qoran cayaandilayaasha. Intaas waxaa dheer marka la eego caqabadaha ka haysta ganacsatada iyo dadka isticmaala cayeyaandilayaasha sidii ay isaga hubin lahaayeen asalnimada iyo tayada waxay soo iibsadeen, taasoo dhalineysa in cidda iibsaneysa ay la qayaani karo. Aiyadoo lala jaanqaadayo Sahriciga Caaalimiga ah ee Haga Maareynta Isticmaalka Cayayaandilayaash, dulucda hindise siyaasadeedka waa inuu hagaa xeerka soo dejinta, soo saark, isticmaalka iyo gacan-ku-haynta cayayeyaandilyaasha si loo xalayo qatarta ku iman karta dhaqaalaha, dadka iyo degaanka. Hindise shariciyeedkani waa inuu muhiimada siiya:

1. Sidii loo abuuri lahaa maamul rasmi ah oo kontoroola cayayaandilayaasha iyadoo:

b. In la dhiso hay'ad Soomaliyeed oo ka masuul ah iskudubaridka, maamulka iyo maareynta cayayaandilyaasha (Hay'ad leh awood sharci}. Hay'addan oo masuuliyadeeda ay noqondoonto iney fududeyso iskudubaridka sharci u dejinta cayayaandilayaasha, xeerarka iyo fulinta, iyadoo kulmineysa dhamaan hay'addaha qaran ee ay maareynta dhinac kasta leh ee cayayaandilyaasha quseeyso bilow ilaa dhamaad. Si ay Soomaaliya u hesho hab sharciyeed miro dhal leh oo si hufanu shaqeyn kara, waxaa talo wax wanaagsan ah in la sameeyo hal hay'ad oo kontoroosha dhamaan walxaha kimikada ah ee beeraha loo isticmaalo (Agrichemicals Control Authority) oo leh mas'uuliyada maareynta iyo maamulka Cayayaandilayaasha iyo Beero-Bacrimiyeyaasha.

t. In la dhiso maamul-sare oo diwaangelin (Registration Board) oo qiimeeya go’aanna ka gaara marka diwaangelin cayayaandile la soo dalbado. Maamulkan sare waa inay ka mid noqdaan khabiiro ka socda wasaaradaha qaran iyo hay’adaha ku shuqulka leh dhinacadyada kala duwan ee maareynta cayayaandilayaasha si maamulkan ay ugu idlaadaan dhamaan qeybo cilmiyeed kala duwan si loo qiimeeyo qatarta cayayaandilyaasha intaan la ansixin.

j. In la dhiso diwaangaliyaha cayayaandileyaasha xogheyn u noqonaya maamulka sare diwaangelinta cayayaandileyaasha. Diwangeliyaha wuxuu noqon karaa shaqsi ama hay’ad maamul oo hoos timaada hay’ada maamuli doonta maareynta cayeyaandilyaasha ama shaqsi ka socda hay’ad muxtarim ah. Shariciga waa inuu cadeeyaa waajibaadka diwaaneliyaha. Waxaa badanaa dhacda in sharciyada guud lagu faafiyo xeer shariciyeedka hore ka dibna wixii faahffahin af sida sida shaqada iyo xilka waajibaad kusoo baxo xeerka fulinta.

x. In la dhiso ama la siiyo hay’adda maamuli doonta ama maamulka sare ee diwaangelinta awood ay dhisto gudiyaal ama ururo talabixin. Gudiyaashan ama ururadan waxay noqon karaan khubaro ka socota wasaaradaha dawlada ee arrinkan quseeyo, danwadaagta arrinakani quseeyo (Stakeholders), Khubarada jaamacadaha, iyo macaamiisha iyo ururada bulshada si loo sugo ka qeybgal baahsan oo lagu idil yahay.

2. In la sameyo habraaca arjiga ogolaanshaha cayayaandilyaasha iyo lifaaqyada muhiimka ee arjiga loo diyaarsho:

b. In la sameeyo habraac lagu codsado isdiwaangelinta ama isdiwaangelin ku meel gaar ah ee cayayaandileyaasha. Habraacan wuxuu cadeynayaa yaa dalban kara ruqsada ka ganacsiga cayayaandileyaasha. Badiyaa waa shaqsi ama shirkad dooneysa inay wadnak keento cayayandileyaasha ama ku sameeyso wadanka gudihiisa. Waxay noqon karaan kuwa isticmaala cayayaandileyaal aad u badan sida beeraha waaweyn iyo shirkadaha xirfadleyda ah beeraha buufisa.

t. In la cadeeyo aqbaarta lagu lifaaqayo marka la sameynayo codsiga arjiga isdiwaangelinta ama in la lagu cadeeyo sidii si sharciyan ah loo soo gudbin lahaa. Badiyaaba maclummadka lama huraanka ah in la gidbio waxaa ka mid ah: shirkada maclummadkeeda khaas ka ah, magaca ay siindoonto shirkdu cayayaandilaha, magaca caadiyan loo yaqaan, walxaha uu ka sameysan yahay, maxa loo isticmaali doonaa (dalag la difaacayo/cayaanka lga difaacaiyo lacabdaba), sida loo isticmaalidoono, (sida

loo qooshi am la isugu dari doono walxaha oo ka kooban yahay, sida loo isticmaalayo, habkee loo isticmalaa, ita jeer ee la isticmaaly), imisa ayey kimikadan ay kaga dhamnaneysaa intaan tan kale lagu shubin ama waqti intee la ‘eg ayaa loo dhex eysiin doonaa isticmaalka isla cayayyaandilhan, marka laga tago walxaha muhiimka ah uu ka kooban yahay maxaa kale oo ku wehliya uu waxani ka sameysan yahay, kimiko ahaan waa maxay astaamihiisu iyo xog ku saabsan sunta ku jirta, xogta ku saabsan tijaabooyinkii wadanka ama meel leh xaaladaha wadanka eeku saabsan waxtarka shaygan, xogta ku saabsan haraaga kusoo hara degaanka isticmaalka ka dib, xogta ku sabsan qatarta shaygan uu u keeni karo dadka, xayawaanka iyo degaanka, digniinta ku haboon ee la soojeediyey, calaamadaha qatarta iyo sawiro kartuun (matalaad), nooca uu yahay weelka lagu shubay cayayaandilaha, warbixin ku saabsan sida loo keydinayo, looga shaqeynayo iyo sida weelasha laga isticmaalay cayayaandilaha iyo haraaga sunta sida loo asturayo iyadoon dadka iyo degaanka aan qatar la gelin, iyo farrinta gargaarka deg dega ah [haddii lacala shil dhaco] iyo wixii kaloo la halmaala.

j. In la sameeyo habraac la cuskado marka codsi la qiimeynayo go’aamadana la gaarayo. Sababta loo sameyanayo habraacan waa in mugdi laga fogaada oo si xalaal ah go’aan gaarista loo sameeyaa si’aanu codsaduhu muran u keenin. Waxaa kaloo ka mid ah habraaca in sharciga lagu qeexo inta nooc oo ay noqon karaan go’aamada kama dambeysta ah oo ay hay’ada ay gaareyso waqti la cayimay gudihiis. Si looga fogaado go’aamo mugdi ku jiro in gaaro, loona dhiiri geliyo in si rasmi ah habka go’aan gaarista loo dejiyo, waxaa alaabaa la gaaraa sedexdan go’aan midkood: go’aan la ansixeyey (Cosdsigii oo la ogalolaaday), go’aangaaris dib loo dhigay (In la hakiyo shaqada go’aan ka gaarista codsiga), go’aan diidmo ah (codsigii oo la diiday).

x. In la cadeeyo waqtiga uu Cayaandilaha la ansixiyey ay ruqsadu ka dhaceyso ama ruqsada ay ka dhaceyso codsadaha taas sababbeysa in diwaangelintii waqtigii dhacay haddii aan dib loo diwaangelin. Cosdiga waa inuu ka yimadaa cidda diwaangliyasay markii hore shaygan haddii ay doonayaan in ay weli suuqa ku sii jirto oo la iibsado. Waa in arji cusub la sameeyaa si loo hubiyo in weli sababihii hore lagu ansixiyey ay weli taam yihiin ayadoo il gaar ah lagu fiirainayo aqbaarta cusub eek u saabsan waxtarka shaygan, qatartiisa, iyo hadday jiraan waqyaaboo ka qatar yar oo badeli kara. Haddii shahadadii diwaangelinta ay ka dhacdo oo aan la cusbooneysiin taas waxay ka dhigan tahay in isdwaangelintii hore ay waxba kama jiraan tahay shaygaas aan lagu iibin karin laguna qeybin karin Soomaaliya. Sharcigu waa inuu si cad u qeexaa habka, waxyaabaha loo baahan yahay iyo waqtiga ay qaadaneyso isdiiwaangelinta.

kh. Waa inay ciddii diwaangelisay ay soo gudbisaa wixii macluumaad ah isbedel ah ee ku soo kordha shayga ay diwaangelisay.

3. In la helo hab dib ueegis loogu sameeyo cayaandilah la diwaangeliyey aydoo la:

b. In la caddeeynayo in hay'ada diwaangelintu mar kasta ay go'aansan karto inay dib u eegis u sameyso shay la diwaangliyey ama shay si ku meel gaar ah loo diwaangliyey haddii ay soo baxaan aqbaar cusub oo la xiriirta cayayaandilaha la diwaangliyey isticmaalkiisa. Aqbaartan waxay ka iman kartaa diwaanka shaygan ee shrciga caalamiga ah ee quseeya (sida Shariciga Stockholm), ama aqbaar ka timid tijaabooyin dheeraad ah, in la wareyey shilal lagu sumoobay shaygan, in deggaanka shaygan dhib u geystay, in shaygan uu adkeysi badan yahay oo aanu dhaqso uga dhamaaneyn deggaanka iyo/ama miraha, iyo in shaygani dhirta sun ku yahay.

4. la sugo kaydinta iyo xoghaynta ayadoo:

b. In la caddeeyo in Hay'ada Diwaangelinta ay mas'uul ka tahay kaydinta diwaanka cayayaandilayaasha kasoo ay ku idil yihiin aqbaarta nuxurka leh ee cayayaandilyaasha sida magaca uu cayaandilaha ay ul baxaday ciddii sameysay, magaca caadiyan loo yaqaan, inta ku jirta walxaha wax dila iyo inta kale, waxyaabaha uu ka kooban yahay, sida loo iticmaalo, iyo magaca iyo cinwaanka cidda diwaangashatay.

5. In si cad loo qeexo nidaamka kontoroolka soo dejinta iyo dhoofinta iyo dib usii dhoofinta cayaayaandilayaasha ayadoo:

b. In la mamnuuco soo dejinta cayayaandile aan la diwaangelin. Xaaladahan waa in sharciga uu tilmaamaa inuu jiri karo ama uusan jiri karin sababo gaar ah sida lagu sharxay nuqdada 2. Intaa waxaa dheer in sharcigu mamnuuco soo dejinta iyo qeybinta cayeyaan dilayaasha aan buuxin sharuudaha sharci qaran lagu qeexay ama iyo go'aanka diwaangelinta. Waxyaabaha la mamnuucayo waxaa ka mid ah walxaha been abuurka ah, walxo si qayaamaha loo sameeyey oo aan gaareyn tayadii la rabay, cayayaandile waqtigiisi dhacay iyo cayayaandileyaasha aan si wacan loo soo (baakeeynin) xerxerin ama weelal u qalma aan lagu soo ridin, ama aan si hagaagsan loogu soo qorin waxyaabaha ku jira.

t. In si qayaxan oon mugdi ku jirin loo sheego in looga baahan yahay ashyaada (alaabta) oo dhan ay buuxiyaan heerka (istaandarka) tayo cabirka ugu yaraan meeshiisa

ugu hooseysa si loo loo dhowro caafimaadka dadka iyo degaanka iyo in la abuuro heer-beeg isku mid ah (Istaandar isku mid ah) shirkadaha soo saara alaab isku mid ah. Marka heerka tayo (Istaandarka) cayayaandile la dejinayo waa in sharuudaha cad cad ee qayxan cayayaandilayaasha FAO/WHO laga dhigtaa tixraac.

6. In la dejiyo sharuudaha shatiga ayadoo:

b. In la waajibiyo dadka ama shirkadaha sameeya, soo dejiya, isku dardara (isku qoosha), xirxira ama weelasha geliya ama dib usii xirxira, qeybiya, ama iibsha cayayaandileyaasha waa inay leeyahiin shati aan waqtigiisu dhicin.

t. In lagu waajibiyo ganacsata ka shaqeysa la dagaalanka cayaanka, oo ay ku jiran kuwa dayuuraha iyo gacmaha isticmaala iyo dhamaan kuwa la dagaalanka qaaska sameeya, intaba ay qaatan shati qaas ah si ay u isticmaalaan mug badan oo cayayaandliyaal ah.

j. In la hubiyo in cayayaandilyaasha si qatar la'aan loo keydiyo lana dhowro lana raaco hagida cilmisyeysan ee hay'adda FAO oo arrinkan quseeya.

7. In la dejiyo sharuucda baakeynta/duuduubka/asturida/weel-gelinta iyo dib u xirxirka ayadoo la caddeynayo:

b. In la caddeeyo sharuudaha farsamo oo hagaya in hab aan qatar ahayen loo baakeeyo/loo xirxiro ama dib loogu baakeeyo, ayadoo cida cosdiga sameynaysa ay soo bandhigi doonto habka ay u baakadeyn doonto ama soo bandhigi doonto weelasha ay ku keydin doonto cayayaandilaha si hor dhac ah waqtiga codiga la sameynayo. Sharicga hore ama xeerarka dambe ee lagu kabo waa iney mamnuucaan inaanay cidana baakat gelin, ama mar labaad did ugu gelin baakado kale, soo dejinin (wadanka usoo dhoofinin), aan la rarin ama la qeybin cayayaandile ayadoon aan la gelin baako ama weel:

i. si nabad gal ah oo aan qatar ahayn loo keydin karo, looga shaqeyn karo, loo isticmaali karo oo aan qatar dheeraad oo laga hortigi kari lahaa ku ah caafimaadka dadka iyo degaanka.
ii. oo aan burbureyn marka lagu kaydiyo xaaladaha waddanka e caadiga sida heerkulka iyo xaaladaha isticmaalka caadiga waqtiga la cayimay;
iii. aan shabahin una ekeyn baakooyinka ama weelasha lagu keydsho waxayaabaha la isticmaalo sida cuntooynka;
iv. waa in si cad loo arki karo tusmada la ansixiyey oo si cad loogu qeexayo han isticmaalka iyo sida qatarta loo dhimo;

v. waxaa haboon in yeelato tab aaney caruurta ku furi karin weelka;

vi. Waxaa haboon in la fakiro inaan weelka dib loo isticmaalin lana adkeeyo dib u istimaalka marka hore ee weelka la sameyanayo.

8. In la dajiyo xeerarka hab qorista tusmada lagu dhajiyo cayayaandliyaasha.

b. In la caddeeyo macluumaadka lagu sharxayo tusmada. Habka badiyaa la raaco waa in lagu xeeqaa sharuudaha muhiimka ah sharciga ka dibna xeerka dambe si faahfaahsan loogu sii dhameystiro. Sharuudaha muhiimka ah waxaa ka mid ah:

t. Macluumaadka shaygan ka sameysan yahay, waxaa ka mid ah: magaca shayga, shayga qeybtee ka tirsan yahay, magaca walxaha fifircoon oo shaqada qabta, walxaha frfircoon imisa ayey ka yihiin guud ahaan shayga, nooca uu u sameysan yahay iyo miisaanka dhabta ah.

j. Qatarta iyo aqbaarta badbaadinta, oo ka mid yihiin calaamadaha qatarta iyo faaffaahin qoraal ah, calaamado ereyo ka tarjumaya, qoraal digniin ah, iyo farshaxan tusaya qatarta iyo midabka qatarta, iyo gagaarka degdega ah caafimaadeed oo ay ku jirto haddii ay suurtogl tahay number laga waco oo xaffiska sumowga koontoroola.

x. Sida loo isticmaalayo oo ka mid tahay: maxaa la beegsanaya cayayaan mise dhir kale sida cawska, imisaa laga isticmaalaya (imisa liitar ama kg), side loo osticmaali (ma isagoo dareere ah ayaa la buufin mise isagoo adaga ayaa la firdhin), sidee dadku isaga difaaci marka laga shaqynayo, intee in la'eg ayaa la sugi dhayida u dambeysa iyo gurashada miraha; si loo keydinayo (sida meel qalalan oo har, aanu heerkulku aad u kuleleyn iwm) iyo sidee loo qubayo iyadoon degaanka iyo dadka waxyeelo u geysanin.

kh. Aqoonsidiga cidda soodejisay ama qeybisa iyo namberka telefoonkooda

9. In la dejiyo sharuudaha isticmaalka iyadoo:

b. In la cayimo hab isticmaalka cayayaandilayaasha dhanka beeraha iyo isticmaalka kaleba ayadoo la qodobeynayo. Qodobadan waa inay waafaqsan yihiin qodobadii Soomaaliya horey uga jiray ee sharciga badbaadinta caafimaadka iyo degaanka. Si loo yareeyo qataraha ku iman kara degaanka iyo caafimaadka dadweynaha, shariciga cayayaanku:

i. waa inuu sharciga qasbaa isticmaalka qalabka loo qoray;

ii. waa in sharciga joojiyaa u isticmaalka cayayaandileyaasha habkii loogu talagalay hab aan aheyn oo ku sharxan tusmada ama aanan ku caddeyn sharuudihii lagu aqbalay diwaangelintii;

iii. waa in sharcigu qasbaa in si wanaagsan loo meyro qalabka kaasoo aan qatar u keeneynin caafimaadka iyo degaanka;

iv. waa in sharciga qasbaa in weelasha iyo haraaga sunta si hufan loo qubaa (kasoo aan caafimaadka iyo beyadda dhibu keeneynin) ama hadday macquul tahay weelka iyo haraagaba dib loo isticmaalo sida sharicigu qeexayo;

v. waa in sharcigu ku qasbaa shaqo-bixiyeyaasha inaanay caruurta, dumarka uurka leh, iyo dadka nugul (sida kuwa dhimirka la') ka shaqeynin sunta cayayaanka marka beeraha lagu buufinayo ama lagu firdhinayo kaasoo keenaya qatar aan la qaadan karin oo caafimaadkooda ku timaada;

vi. in sharcigu ku qasbo shaqo-bixiyeyaasha inay shaqaalahooda ku waajibiyaan u isticmaalka cayayaandileyaasha sidii loogu talo galay si aan aheyn oo aan qawaaniinta waafaqsaneyn;

vii. In sharcigu ku waajibiyo shaqo-bixiyeyaasha inay shaqaalahooda siiyaan tababarro iyo qalab ka difaaca (sida gacmogshi, ookiyaale iyo tuuteyaal adkeysi leh) markay sunta buufinayaan ama firdhinayaan;

viii. In sharicigu ku waajibiyo shaqo-bixiyeyaasha in shaqaalaha ka shaqeeya sunta cayayaandileyaasha la qiimeeyo caafimaadkooda si joogta si loo ogaado, loona qiimeeyo iyo in la daaweeyo haddii xanuuno la xiriira cayayaandilyaasha ama dhaawac yimaado.

10. Dejinta Xeerarka Xayeysiinta Cayayaandileyaasha

b. In xeerar haga xayeyssinta meediyaha (Warlaliska) cayayaandilayaasha la soo saaro si loo hubiyo inay waafaqsan yihiin sharuudihii diwaangelinta siiba fariinta hagida iyo waaninta iyadoo fiiro gaar ah la siinayo: kuwa la xiriira dayactirka iyo isticmaalka qalabka loo isticmaalayo, qalab badaado oo ku haboon, fiiro gaar ah oo la siiyo dadka nugul iyo qatarta kaka timaada weelasha ay sunta ka dhamaatay isticmaalkooda.

11. Dejinta Xeerka Keydinta, Xamuulka iyo Qubista (Daadiska) ayadoon wax loo dhimin degaanka iyo dadka cayayaandileyaasha iyadoo:

b. In la sameeyo xeerar guud oo haga sida loo keydiyo cayayaandileyaasha. Xeerarkan waxaa ka mid noqon kara: in si cad la kala saaro cayayaandileyaasha dusha lasoo dhigay si loo arko iyo kuwa maqaasiinka ku jiraba laga wayaabaha la cuno iyo waxyaaba la isticmaalo; in meel leydh (leeyr) ku haboon leh la dhigo aan caburneyn, dhulka ama sagxada ay tahay mid aan wax dusinin ama aan waxba ka sii bxin (sagxad si fiican loo shamiiteeyey); in si fooljigan loog ilaaliyaa inay cid aan shaqo ku lahyn soo gasho; in lag helaa meesh keydka qalabka iyo ashyaada kale ee lagula tacaalo haddii weelal sun ku jirto ay dilaacaan iyo wax alaale wixii xaalad deg deg ah ee soo kordha

iyo wixii la mid ah. Waxaa xeerer dheeraad ah loo sameyn karaa markii ay cadada cayayaandilayaasha la kedinayo ay dhaafto xadka dhaafto ama qaar ka mid ah cayayaandilayaasha iyo ashyaada kale ee qaaska ah la keydinayo. Xaaladahan oo kale waxay u baahanayaan in qatar imam karta la' ilaaliyo oo la kordhiyo xakameynta sida in la cayimo goobaha kaydka cayayaandilaha laga dhisi karo si qatarta ka iman karta loo yareeyo. Xakameynta waxaa ka mid ah in laga fogaado aan keyd laa dhisin goobaha dadka deggna yahay, dukaamada iibsha cuntada iyo cabitaanka, isbitaalada, iskuulada, iyo biyo mareenada. Sharciga waa inuu kala saara baaxada keyga cayayaandalyaasha sida ganacata soo dejisa mug (rar badan) badan iyo baqarka yar ee tuulada ku yaala oo tafaariiqda iibsha.

12. In la sameeyo xeerar haga xog aruurinta iyo qiimeyta joogta ah ayadoo:

    b. La aasaasayo hay'ad u idman loona wakiisho in sameyso qiimeyn joogta ah iyo xog uruurin, ay ka mid tahay inay xogta ururiyaan iyo inay inta kale ee ku shaqada leh ku qasbaan inay ururiyaan, xafidaan soona gudbiyaan xogta.

13. In sameeyo xeerar haga sida shilalka loo riboor-gareeyo ama loo soo tebiyo ama qaado (hab qoraal iyo oraahba)

    b. In la qeexo goorta shil lagu tilmaami karo arrin dhacay oo cayayaandile uu keenay. Shilalka waxay noqon karaan kuwo waaweyn iyo kuwa kaleba aa ay sababeen cayayaandileyaal shillakaas oo dhacay ama dhici kara saameyn xun ke leh caafimaadka dadka, degaanka, ama dalaga (tusaale ahaan qubasho (daadasho) dhacda marka la rarayo, daadin ama qubis sharci darro ah, kalluun dhamaaday ooay sababtay biyihii oo sumoobay, dad tiro badan oo sumoobay bulshada dhedeeda iyo wixii la mid ah IWM). Is-sumeyn ula kac loo sameeyey oo cayayaandileyaal la isticmaalay oo dad iskood iku dilaan waxay u baahan doontaa fiiro gaar ah marka la riboor-gareynayo.

14. In la dajiyo xeerar haga kormeerka iyadoo:

    b. In la shaqaaleyo dad xirfad leh oo noqon kara kormeerayaal iyo in la dajiyo mas'uuliyaadooda shaqo waxay noqon doonto iyo habraaca ay kormeerka barista ama dabgal u gudanayaan; xeerarkan iyo mas'uuliyada kormeerayaasha wxaa dejinaya dawlada dhexe iyo kuwa maamul gobloeedyada. Dawlad goboleedyadu waxay sameyn karaan qawaaniinta lagu kabayo oo faahfaahsan.

15. In la cayimo dabiyada iyo ciqaabta

    b. Setting enforcement provisions consisting of a list of offences, the penalties associated with each offence, and the applicable procedures once an offence has been committed. It should also set rights and appeals related to enforcement procedures. In

la sameeyo hab fulin ka kooban tirada ama noocayada dambiyada, ciqaabtadambi kasta iyo habraac la raaco marka dambi cidi gasho. Waxaa kaloo ay tahay la sameeyo habraaca dhowra xaquuda cida dambiga lagu soo eedeeyey iyo habka ay racfaan u qaadan karto

## 6. Mabaadiida Hagaysa Siyaasadda

Siyaasaddan iyo sharuucda la dejin doono waxaa hoggaaminaya oo horseed u ah Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka; Wasaaradda oo la kaashanaysa Wasaaradaha kale ay quseyso iyda oo lagu saleynayo ajendaha guud e Dawlada sida uu Qorshaha Horumarinta Qaranka 2019-ka qabo oo ah in la kordhiyo 20% wax soo saarka cunto, iyo in laga difaaco waxyeellada caafimaadka dadweynaha iyo degaanka. Iyadoo degaanshaha iyo nabada ay sii kordheyso, Dawlada Soomaaliyeed waxay dhiseysaa hay'adihii dawliga ahaa iyadoo ay marba marka ka dambeysa ay sii kobceyso awoodeeda fulineed ee ku wajahan sharciyada iskudhafan oo dhinacyo badan taabanaya, oo ay ka mid tahay in la sugo tayada iyo isticmaal aan qatarta lahayn ee cayayaandilayaasha dhammaan dhulka Soomaliyeed iyadoo habka federaalnimo ee soo ifbaxay (nagu cusub) la raacayo. Waqti xaadirkan oo waddankii ka gudbayo xaaladdii cakirneyd ee adkeyd una gudbayo xaalad horumarin waxaa haboon in la raaco hab xeer-degis fudud oo la toostoosin karo lana sii turxaan bixin karo mustaqbalka ayadoo aasaas laga dhiganayo xeerar goboleeyada iminka jira sida (Sida Gobolka Bariga Afrika). Mabaadida hagaysa oo lagu xushay siyaasad dejintan waa kuwa hoos ku xusan;

**Lahaanshaha:** Hirgelin waxqabad wanaagsan leh oo ku saabsan siyaasad qarameedka cayayaandilayaasha waxay u baahan tahay dadaalka inta ku shaqada leh oo dhan. Lahaanshahu waa qaabeynta iyo fulinta ficillada iyo doorka siyaasadeed ee ay wadaagayaan. Inta hawshan cayayaandilaha wadaagta oo idil waa in ay ku lug lahaadaan marxaladaha fulinta, kormeeridda, iyo qiimeynta ee siyaasadda u degsan.

**Kalsooni**: Tani waxay fareysaa in siyaasadda ku aaddan cayayaandilaha noqoto mid lagu kalsoonaan karo marka laga eego dhanka dejinta, qiimeynta iyo fulinta iyo weliba sida loogu dabbaqayo nidaamka dawladeed ee federaalka ah.

**Iskusi u saameyneysa**: Tani waxay ku saabsan tahay beeraleyda iyo inta kale ee isticmaasha, soo dejiyayaasha iyo kuwa ka ganacsada oo ay siyaasadani saameyneyso in ay ku kala duwan yihiin nooca ganacsi, qataraha ku iman kara hawlahooda iyo awoodda ay u leeyihiin inay fuliyaan shuruudaha lagu soo rogay ee sharcigan. Sidaa darted Siyaasaddu waa in ay qaadato

habab kala duwan si looga taxaddaro in shuruuraha lagu xirayo ay noqdaan kuwa aan isku so u saameyneynin.

**Suuqa ku Wanaagsan**: Siyaasaddani waa in ay la socotaa dhiirragelinta tartanka cayayaandilayaasha ee suuqa.

**Sharciyadda**: Siyaasadeed waxay u baahan tahay sharci iyo habraac ku habboon oo taageera.

**La jaanqaadda Gobolka**: Siyaasadda qaran ee cayayaandilaha waa in ay la jaanqaadi kartaa midda gobolka. Siyaasadaha qaran waa in ay Soomaaliya u suurtageliyaan in ay ka faa'ideysato awoodda gobolka ka jirta ee dalalka dhoofiya ka hor inta ay Soomaaliya horumarin awoodeeda soo dejin mid hore iyo mid cusuba.

**Wadaagga iyo wada xaajoodka**: Dhammaan inta shaqadan ku saabsan cayayaandilaha wadaagta waa in ay si joogta ah uga hawlgalaan heerarka fulinta, kormeerka iyo qiimeynta wixii ku saabsan siyaasaddan.

**Ku dhawaashaha Siyaasad-dejinta**: Markii loo baahdaba, dib u habeynta siyaasadda ku aaddan cayayaandilaha iyo isbedellada lagu sameynayo waa in ay isku raacaan waqti cayiman inta hawshan wadaagta.

**Masuuliyadda Maaliyadeed**: Masuuliya maakiyayeed waxay u baahan tahay in dhamaan hantida iyo shaqada lama huraanka u ah in la sameeyo siyaasadda bacrimiyeyaasha beeraha in loo huro ayadoo mar walba laysku eegayo tayada iyo qarashka galaya.

**Summad Muuqata**: Cayayaaldilayaasha la keeno Soomaaliya oo idil waxay leeyihiin caddeymo ku dheggen oo laga arki karo waxa ay ka sameysan yihiin, waxay ka kooban yihiin iyo qaabka loo isticmaalo. Waxaa intaa sii dheer in la socodka tayada ee alaabtan ay ku saleysan tahay ka run sheegidda qoraalka ku dheggen.

**Deegaan Dhawrid**: Tani waxay fareysaa isticmaal wanaagsan oo ku saleysan baahida loo qabo dhawridda iyo ilaalinta deegaanka iyadoo la isticmaalayo IPM ee maareynta cayayaanka, oo yareeyey isticmaalka cayayaandilaha korna u qaaday wax soo saarka, tayada cuntada iyo daqliga malaayiin beeraley ah oo dunida dacalladeeda jooga. Wax ay siineysaa beeraleyda fursad ay ula xiriiraan dadka suuqyada keena miro iyo dhir wanaagsan oo tayo leh, sidoo kale waxay ka hortageysaa faafidda cayayaanka iyo cudurrada. Sidoo kale dhawridda carrada kana caawinaysaa nafaqeynta iyo helidda biyaha, soona saaraya dhir caafimaad qabta oo u adkeysan karta cayayaanka iyo cudurrada.

**Maareynta Khatarta**: Tani waa in ay toos u wajahdaa go'aan ka qaadashada sugnaan la'aanta caafimaadka bulshada iyo bad-qabka deegaanka marka ay timaado cayayaaldilayaasha.

## 7. Aragtida Siyaasadeed

Waa in al taageero sidii loo sameyn laha suuq cayayaandile oo tayleh oo kaafin kara baahida beeraleyda isla markaana dhowraya fayoqabka caafimaad ee bulshada degaankana aan waxyeelo loo geysaneyn.

## 8. Hawlgalka Siyaasadeed

Waa in la taageera sidii loo sameyn lahaa hab xiriirsan oo suuqgeyn ah oo lagu gaarsiiyo beeraleyda cayayaandliyaal ay ibbsan karaan, habkan xiriirsan, laga bilaabo ganacsata waaweyn ilaa kuwa tafaariiqda, ay faaido ka heli karaan si xor ahna sicirka loo jaangooyo oo aan aheyn gancasi dad yar ay gacanta ku hayaan ayadoo la dhowrayo fayoqabka caafimaad ee bulshada degaankana aan waxyeelo loo geysaneyn.

## 9. Ujeedada Guud ee Siyaasadeed

Ujeedada siyaasada waa inay ka qeybqaadataa in kor loo qaado wax soosaarka beeraha, dhaqaale kororka, iyo daqliga aydoo la joogteynayo helida iyo si khatar la'aan u istcmaalka cayayaandileyaasah.

### 9.1 Ujeedada Cayiman ee Siyaasadeed

1. In la abuuro jawi ganacsi oo horumariya hab xiriirsan oo suuqgeyn ah oo lagu soo dejiyo laguna qeybiyo cayayaandilyaasha dhiirigelinaya tayada iyo ilaalinta fayoqabka bulshada iyo deggeenkahabkan xiriirsan oo dhan laga bilaabo ganacsadaha soo dejiyey ilaa beeraleyga isticmaalaya.
2. In la kobciyo awooda ganacsata si ay u keenaan cayayaandliyaal la ibsan karo oo aan khatar lahayn iyo in la dhiirigeliyo in si masuuliyad leh looga ganacsado cayayaandileyaasha ayadoo la dhiirigelnayo lana garab istaagayo ganacsata gaarka inay maalgashtaan habab wanaagsan oo maamula (ka ganacisga) cayayaandileyaasha.
3. In la dhiso hab dabacsan oo xeeraya, oo kormeera, kasoo aasaas looga dhigayo farsamada iyo awooda ganacsiga gaarka loo leeyhay e hadda jirta si loo sugo helida cayayaandile tayo badan leh dhamaan qeybaha kal duwan ee habka xiriirsan ee suuqgeyn (laga bilaabo ganacsadaha soo dejiyey ilaa beeraleyga isticmaalaya), habkan

oo beeraleyda muraadkooda u fulinaya, caafimaadka bulshada iyo degaankana aan waxyeelo u geysaneynin.

4. In la kobciyo awooda beeraleyda si ay khatar la'aan, faaidoleh oo joogta ah u isticmaalaan cayayaandileyaasha iaydoo la waciyigelinayo badbaadada caafimaadka bulshada iyo degaanka.
5. In la dhiirigeliyo isticmaalka cayaayaandileyaal kala duduwan IPM (Integrated Pest Management) (oo ka kooban dhamaan farsamooyinka kala duwan ee loola dagaalamo cayayaanka sida abuur la hagaagiyey iyo hababka loo keydsho carrada) iyo in la taabogeliyo hab beerashada wanaagsan tasoo kordhineysa habwanaaga iticmaalida cayayaandileyaasha.
6. In la taageero cilmibaarista cayayaanka beerha iyo baarita cudurada si looga caawiyo beeraleyda in ay isticmaalaan intii loo qoray iyo hab isticmaalkii loo faray ee dalgyo beerashada kala duwan iyo deggaan beeraha kala duduwan. Waxaa kloo muhiim ah in la abuuro mashruuc fidin oo lagu sii faafiyo ama baahiyo hababka wanaagsan (aydoo la isticmaalayo wajalo tusaale lagu sameeyo iyo falalgaarsiin ah) iyadoo wadanka oo dhan la gaarsiinayo.

7. In la dhiso awood xeereed la jaanqaada xeerarka goboleedyada (sida gobolka Geeska Afirca) iyo kuwa caalamiga ah heerkooda kuwaa oo leh awoodii lagu fulin lahaa si loo hubiyo tayada cayayaandilyaasha la soo dejiyey (wadanka la soo geliyey) iyo hab wanaaga isticmaalkooda iyo ka shaqeyntooda; taasoo looga gol leeyahay in Soomaaliya ay ka soo dhalaasho kaainteeda marka la eego sharuucda caalamiga ah eequseeya arrinkan.

## 10. Maamulka iyo Isku Xirnaanta Hay'adaha

Horumarinta xeerar wax ku ool ah oo loogu tala galay xakameynta ayaa waxay u baahan tahay isku duwid haddii ay ahaan lahayd marxaladda qorsheynta iyo fulinta sharciyada ku saabsan arrintaa. Soomaaliya ayaa waxay hadda leedahay nadaam federaalka ah, kaasoo la filayo in dawladda dhexe ay kala shaqeyso dawlad goboleedyada dhanka horumarinta, kormeeridda iyo qiimeynta xeerarka wax looga qabanayo dhinacyada dhaqaalaha. Si kartaba ha ahaatee, dastuurkii hagi lahaa arrimahaa oo dhan ayaa weli dhisiddiisu socotaa. Iyadoo aysan caddeyn doorka iyo masuuliyadda ay cid waliba yeelaneyso ayaa waxay noqoneysaa mid adag. Doorka iyo masuuliyadda looga baahan yahay isku duwidda ee loo baahan yahay ayaa waxaa ka mid ah: diyaarinta codsiyada, diiiwaangelinta soo saarayaasha, soo dejiyayaasha iyo kuwa qaybiya,

baaritaanka lagu sameynayo marka ay dalka soo galeyso, shaqaale loogu tala galay oo kormeera lana socda. Sharci sameynta cayayaandilaha ayaa noqon karta mid adag. Intaa waxaa sii dheer, xaaladda hadda oo aysan jirin xeer iyo nadaam maamul oo la raaco, waxaa habboon in lagu fuliyo heshiis is afgarad oo u dhexeeya dawladda federaalka iyo kuwa goboleedyada si loo caddeeyo doorka iyo masuuliyadda sharciga lagu koontroolayo iyo wixii ku saabsan baaritaanka iyo xaqiijinba. Isku duwiddaas la'aanteed hawshu waxay noqoneysaa mid is dul saran isla markaana aan lahayn awood dhaqaale iyo mid farsamo, waxayna u horseedi kartaa hawlgal aan hagaagsaneyn iyo sidoo kale maalgashi dadweyne oo liita marka la sameynayo xeerarka xakameynta cayayaandilaha iyo walxaha kiimikada beeraha kobciya. Tani waxay hoos u dhigi doontaa awoodda lagu horumarinayo: kobaca wax soo saarka, la dagaalanka cunta yarida iyo saboolnimada, iyo ilaalin caafimaadka bulshada iyo deegaanka.

## 11. Natiijada laga sugayo

1. Soo dejinta cayayaandile tayadoodu sarrayso oo la socon kara heer gobol iyo caalamiba waqtiyada dhaw.
2. Soo saarayaasha cayayaandilaha, kuwa soo dejiya iyo inta ka ganacsata waa in ay diiwaangashan yihiin, tababaran yihiin, sharciyeysan yihiina, markaa dhammaan inta ku shaqada leh cayayaandilaha qayb ayey ka yihiin hawsha.
3. Isticmaalka cayayaandilaha oo la hagaajiyey iyadoo la adeegsanayo isticmaalka cayaayaandileyaal kala duduwan IPM (Integrated Pest Management) iyo yareynta:

   b. Hoos u dhac ku yimaada wax soo saarka cayayaanka iyo cudurro ku dhaca 60% sannadka 2030.

   t. Waxyeellada soo gaarta beeraha ee la diiwaangeliyo oo ka badata heerarka haraaga ugu badan (Maximum Residue Levels-MRLs) 90% sannadka 2030

   j. Waxyeellada sumowga ah ee soo gaarta dadka, xayawaanka guryaha lagu haysto iyo duurjoogta 90% sannadka 2030

   x. Webiyada iyo biyaha dhulka hoostiisa ah oo sumooba 90% sannadka 2030

4. Hay'adaha dawliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo ka wada shaqeeya maaraynta cayayaandilayaasha heer qaran oo u baahan cayayaandile beeraleydu ay isku halayn karaan;
5. Cilmi-baaris, horumarin, iyo adeegyo dheeraad ah oo ku saabsan dalagyada beeraha / cayayaanka iyo cudurrada;

## 12. Jihada Siyaasadeed

Iyadoo la waafajinayo aragtida, hadafka, ujeedooyinka, iyo mabaadi'da hagaysa ee kor ku xusan, qaybtan soo socota ayaa noqoneysa jahada siyaasadeed ee cayayaandilayaasha ee Soomaaliya.

### 12.1 Iskaashi

Dawladda Soomaaliya waa in ay abuurtaa awooda maamul iyo farsamo ee la huraanka ah lagu qiimeynayo codsiga diwaangelinta isitcmaalka cayayaandliyaasha Somaaliya gudeheeda. Waa iney Dawladu boorisaa soo dejinta cayayaandileyaasha iyagoo isticmaalaya dhiirigelint-dhaqaale oo bixinayaan haddii lala shirkoobo soo-saareyaasha magaca leh ee caalmiga ah iyo kuwa gobolka. Maalgashadayaasha ajnabiga ah waa iney u hogaansamaan xeerarka iyo sharuucda caalamiga ah iyo shruucda, siyaadaha, xeerarka iyo halbeeyada xakamyenta gudaha.

### 12.2 Soo dejinta

Soo dejinta cayayaandilaha waa masuuliyad ay leeyihiin sharikadaha gaarka loo leeyahay, Waxayna masuuliyaddaas la wadaagayaan dawladda oo dusha kala socon doonta ganacsigaas. Sharikadaha gaarka loo leeyahay oo idil xor ayey u yihiin see dejinta cayayaandilaha, waxaase la doonayaa in ay dhawraan sharciga iyo xeerarka loo dejiyey ee diiwaangelinta ganacsigooda, sharciyeynta, wargelinta, kormeeridda isticmaalka iyo sida qaadayo cayayaandilayaasha. Dawladdu waa in ay siisaa sharikadaha in ay dalka keenaan noocyada cayayaandile iyo inta ay la ekaanayso iyadoo loo eegayo xilliyada ay miruhu soo go’aan. Waa in ay la jaanqaadaan siyaasadda horumarinta qaran si looga hor tago in xaddi ka badan baahidu soo galo iyo kaydka oo buux dhaafa oo aan la isticmaali Karin ka hor inta aysan waqtigoodu dhicin.

Si kastaba ha ahaatee, marka ay suurtagal noqotaba, dawladda Soomaaliya waa in ay ku dhiirragelisaa sharikadaha gaarka loo leeyahay in ay ku dadaalaan ku iibinta cayayaandilayaasha jumlo ahaan si looga faa’ideysto dhimista kharashka. Dawladdu waa in ay ku dadaashaa sidii ay uga mid noqon lahayd hay’adaha gobolka (sida EAC iyo COMESA), oo wax ku bixiya nidaamka jumladda ah. Soo dejiyeyaashu waa inay waafaqsan yihiin shuruudaha dhammaan sharciyada jira, waana in ay helaan oggolaasho ay dalka ku keenaan cayayaandilaha. Nooc walba oo cayayaandile ah oo dalka la keeno waa in ay la socotaa xaashidii ciddi soo sameysay, qoraal ku saabsan rarka iyo xamuulka, shahaaddada baaritaanka soo raridda ka horeysay iyo wax walba oo ay Wasaarada Beeraha iyo Waraabka u baahan tahay oo khuseeya shuruucda cayayaandilaha.

## 13. Ka ganacsiga Dullin-dilaha iyo Suuq-geyntooda

Shirkadaha gaarka loo leeyahay ayaa ah kuwa ugu horreeya ee ka masuulka ah ka ganacsiga iyo suuqgeynta suntan cayayaanka. Dawladdu waa in ay u fududeysaa una sameysaa xeer la raaco.

### 13.1Kor u qaadidda tayada iyo qaybinta wanaagsan

Soo dejiyayaasha oo idil, qaybiyayaasha iyo kuwa tafaariiqda u iibiya waxay u madax bannaanyihiin ka ganacsiga iyo suuqgeynta suntan cayayaanka dalka gudihiisa. Haseyeeshee waa in ay raacaan shuruucda iyo xeerarka loo dejiyey.

Si kor loogu qaado wax soo saarka isla markaana loo ilaaliyo badqabka dadka iyo deegaankaba, dawladdu waa in ay gacan ka geysataa fududeysaana isticmaalka fayow iyo hab beerashada wanaagsan, sida isticmaalka cayaayaandileyaal kala duduwan IPM (Integrated Pest Management) beeraleyda. Tani waa in ay ku timaaddaa kabitaan canshuur, qafiifin iyo baraarujin ku aaddan deegaanka iyo macmiisha oo si wanaagsan u isticmaasha. Taasina maaha in ay suuqyada khalkhla geliso. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waa in ay ka qayb qaataan ka ganacsiga suntan cayayaanka iyo wixii la xiriira ee kabid ah ama wacyigelin ee ay dawladdu waddo si hufan oo habboon kuna saleysan deegaanka iyo xeerarka.

Dawladdu waxay soo saareysaa nidaam ay ku taageereyso sharikadaha gaarka loo leeyahay si ay u sameeyaan ka ganacsi iyo suuqgeyn masuuliyadi ku jirto, lana wadaageysaa hay'adaha maaliyadeed iyo kuwa ay shaqada ka dhaxayso si loogu helo amaah iyo in la yareeyo khatarta ka iman karta maalgelin xad dhaaf ah. Dawladdu waa in ay siisaa mar walba xog la hubo oo ku saabsan sicirka ee gobolka iyo mid caalamiyaba.

Qaybinta cayayaan-dilayaasha waa in laguwargeliyaa iyadoo la eegayo xeerarka u dhigan degmada ee ku aaddan saadaasha ama xogta ku aaddan cayayaanka taas oo lala wadaagayo dawlad goboleedyada. Hababka ka jira dalka ee qaybinta cayayaan-dilaha Thepesticide distribution channels existing in thecountry (soo dejiyayaasha-qaybiyaasha ee la macaamila beeraleyda) waa in lala socdaa, si loo xaqiijiyo caafimaad qabka bulshada iyo deegaanka.

Hab lagu helo xog sugan oo xaqiiqa ah oo isku xirta; soo dejiyayaasha, qaybiyaasha, ganacsatada ka ganacsata walaxaha beeraha la geliyo; iyo Wasaarada Beeraha iyo Waraabka iyo wasaaradaha dawlad goboleedyada ay ku wada shaqeynayaan waa in la abuuraa si loo hagaajiyo ka ganacsiga iyo suqgeynta cayayaan-dilayaasha.

## 14. Wacyigelinta isticmaalka habboon ee cayayaan-dilayaasha

### 14.1 Adeegyada Fidinta

Dawladdu waa in ay abuurtaa Guddiga Cayayaan-dilaha Soomaaliya “Somalia Pesticide Board” (SPB), oo farsamo ahaan hagaya wixii ku saabsan horumarinta iyo taabbagelinta mashruucyada fidinta ee wacyigelinta isticmaalka habboon ee cayayaan-dilayaahsa.

Dawladda hoose, sharikadaha gaarka loo leeyahay iyo inta daneyneysa waa in ay kula shirkoobaan SPB sidii loo dhisi lahaa dugsi lagu barto cilmiga beeraha (FFS), tijaabooyin, maalmo lagu qaato beeraha dhexdooda, iyo tababarro ay helayaan hay’adaha iyo shakhsiyaadka ku shaqada leh oo dhan, halkaasoo lagu baranayo sida ugu wanaagsan ee loo maamulayo cayayaan-dilayaasha.

Wasaaradda iyo hay’adaha ay shaqada ka dhaxayso waa in ay siiyaan tababar dadka ka shaqeeya fidinta dhul beereedka (Horumarinta beeraleyda iyo kuwa fududaynaya FFS) siiyaanna beeraleyda hab ay raacaan si ay u korodho aqoontooda xagga cayayaan-dilaha.

### 14.2 Cilmibaarista (Tijaabada) iyo Horumarinta

Cilmibaarista iyo horumarinta walxaha ay ka sameysan tahay cayayaan-dilaha iyo shuruudaha waxaa ka masuul ah dawladda oo ay u qaabilsan tahay SFB iyo hay’adaha cilmibaaris ee la xiriira, kuwa gaarka loo leeyahay iyo jaamacadaha.

Dawladdu waa in ay sameysaa kormeer sahan oo muddeysan oo lagula soconayo soo dejinta iyo isticmaalka cayayaal-dilayaasha iyo saameynta ay ku yeelanayaan caafimaadka bulshada iyo deegaanka iyadoo adeegsaneysa macluumaadka la soo uruuriyeyee MRLs wax soo saarka beeraha, sahanka deegaanka si loo yareeyo wixii khatar ah loona sameeyo siyaasad rasmi ah mustaqbalka. Iyadoo lagu saleynayo macluumaadka la hayo, SPB iyo inta ay hawsha wadaagaan ayaa laga doonayaa in ay soo saaraan talooyin ku aaddan isticmaalka cayayaan-dilaha iyo cudurrada soo gaara dalagyada. Talo bixintii ugu dambeysay waa in ay helaan ganacsatada cayayaan-dilayaasha iyo beeraleydaba si ay ugu isticmaalaan sida ugu habboon.

## 15. Dhowridda degaanka iyo isbeddelka cimilada

Waxaa la ogaaday in cayayaan-dilayaasha oo si aan haboonayn loo isticmaalo in ay u daran tahay deegaanka, iyadoo dhulka hoos u gasha una dusta webiyada iyo dooxooyinka sumeysana noolaha ku jira, gaar ahaan cayayaanka faa’iidada leh, waxayna horseeddaa in ay dhaawacdo

habka nolosha dabiiciga ah ee isku xiran. Cayayaan-dilaha oo aan si aan habboonayn loo adeegsado ayaa sidoo kale keenta in ay dhintaan noocyada shimbiraha, noolaha biyaha ku jira iyo xayawaanaadba[1]. Nidaamku waa in uu gacan uga gaystaa haddaba arrimaha faya-qabka deegaanka iyo dhowriddaba sidan:

i. Beeralayda waa in loo tababaraa adeegsiga habboon, ugu macquulsan kuna hagaagsan isticmaalka dullin-dilayaasha. Ganacsatada cayayaan-dilayaasha waa in lagu tababaraa sida ugu wanaagsan uguna nabadgelyada badan ee loo kaydiyo, maamulo, loona raro cayayaan-dilayaasha. Waa in wacyigelin loo sameeyaa dadka ku shaqada leh si looga hortago biyaha oo wasaqooba, cayayaanka faa'iidada leh oo dhinta, xayawaanka aan la dhaqan oo sumooba, iyo wax soo saarka cunno oo wasaqooba taasoo ka dhalata iyadoo aan si habboon loo isticmaalin cayayaan-dilayaasha.
ii. Dawladdu waa in ay soo saartaa warbixinno sugan oo sannadle ah kuna saabsan meelaha cayayaanku aad ugu badan yahay si loo xaqiijiyo isbedello ku yimaada caabuqa ka dhasha cayayaanka iyo cudurrada, markaa dhawridda dhirta waxay u baahan tahay miro kala duwan iyo goobo lagu xanaaneeyo laguna baaro si ay u fududaato xogta joogtada ah ee la helayo.
iii. Isticmaalka IPM waa in la baahiyaa laguna daraa hab nafaqaynta dhirta ah si dhiirragelin loogu sameeyo hab wax saar oo deegaankana ilaalinaya.
iv. Abuuridda hab la raaco oo loogu tala galay dadka aad u isticmaala, sida beeraleyda waaweyn iyo kuwa ka shaqeeya la dagaalanka cayayaanka, si loo helo hab dhawraya deegaanka iyo in si hagaagsan loo maamulo cayayaan-dilayaasha aan la isticmaalin iyo weelasha ay ku jiraan.

## 16. Heerarka Sharciyada iyo dhowridda tayada

Dawladda Federaalka ayaa ka masuul ah wixii ku saabsan cayayaan-dilayaasha si loo hubiyo in nidaamka iyo ka ganacsigaba ay yihiin kuwa diiwaangashan iyo weliba tayada cayayaan-dilayaasha loo iib keeno dalka.Si loo sharciyeeyo ka ganacsiga iyo isticmaalkaba, waa in ay dawladdu ka soo saartaa sharciyo hagaya cayayaan-dilayaasha iyo in ay diyaariso xeerar wasaaradeed loo raacayo fulinta la socodka cayayaan-dilayaasha, ganacsatada dagal-beereedka iyo goobahoodaba.Tani waxay fududeyneysaa sharciga iyo xeerarka la raacayo si loo nidaamiyo qaybaha cayayaan-dilayaasha loona sugo tayada ka ganacsigeeda.

[1]Effects of Pesticides on Environment, Plant, Soil and Microbes pp 253-269.https://link.springer.com/chapter/10.1007/978-3-319-27455-3_13

### 17. Maamulka iyo isku xirnaanta Hay'adaha

Si loo dhaqan geliyo siyaasaddan, waxaa jiraya xiriir ka dhaxaynaya FMOAL, wasaaradaha dawladda iyo hay'adaha ay ka mid yihiin kuwa gaarka loo leeyahay, sharikadaha horumarineed, ururrada bulshada, iyo ururrada beeraleyda. Inkastoo ay tahay in FMOAI ay lahaato hoggaanka fulinta, haddana hay'adaha kale waxa ay la wadayaan:

i. Wasaaradaha kale sida Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, hay'adaha qaabilsan degaanka iyo dawlad goboleedyada ay shaqo wadaagga yihiin, jaamacadaha iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay.
ii. Ha'adaha horumarinta qaabilsan sida Hay'adda Cuntada iyo Beeraha (FAO), Hay'adda Caafimaadka Adduunka, Hay'adda u qaabilsan Qaramada Midoobay barnaamijyada degaanka (UNEP), Hay'adaha caalamiga ee aan dawliga ahayn, iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo hubinaya in si wanaagsan loo fuliyo hawsha iyadoo la raacayo xeerarka caalamiga ah ee keenista, qaybinta iyo isticmaalkaba.
iii. Shirkadaha wax soo saar ee gudaha iyo hay'adaha cilmibaariseed waxay hubinayaan soo saaridda miro tayo sare leh oo xamili kara cayayaan-dilayaasha, iyo weliba horumarinta xermooyin waxsoosaarka beeraha ah oo dhiirragelinaya adeegsiga cayayaan-dilayaasha si loo helo dhir caafimaad qabta, loona yareeyo u nuglaanta miraha cayayaanka iyo cudurrada.

---DHAMMAAD---

### Lifaaqa 1aad

*Legally binding international conventions with direct implications for pesticide legislation in Somalia:*

- The Codex Alimentarius, and morespecifically the Codex Committee onPesticide Residues, operational since1 966 (55)
- The Montreal Protocol on Substances that Deplete the Ozone Layer, adopted in 1 987 and entered into force in 1 989, and its subsequent amendments (56)
- The Basel Convention on the Control of Transboundary Movements of Hazardous Wastes and their Disposal, adopted in 1989 and entered into force in 1 992 (50)
- The Rotterdam Convention on the PriorInformed Consent Procedure for Certain Hazardous Chemicals and Pesticides in International Trade, adoptedin 1 998 and entered into force in2004 (1)

- The Stockholm Convention on Persistent Organic Pollutants, adopted in2001 and entered into force in 2004(57)
- The Convention concerning Safety andHealth in Agriculture. ILO, adopted in2001 and entered into force in 2003(44)
- The Convention concerning Safety in the Use of Chemicals at Work, adopted in 1 990 and entered into force in 1993(58)